Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Gabdhaha Asharaafta lalama guursan karo

Maa ikhtassa (saad) bihi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Al Qasdhalaanii

Kitaabka “Al Mawaahibu Al Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah” waxaa dhigay oo allifay Al Qasdhalaanii, ahna al xaafith Shihaabu Al Ddiini Abuu Al Cabbaas Axmad bin Muxammad bin Abii Bakar bin Cabdu Al Malik bin Axmad bin Muxammad bi Xusayn bin Calii Al Qasdhalaanii Al Misrii Al Sh-shaaficii, al imaamu al callaamah, al xujjatu al rraaxilah, al faqiih, al muqri'u, al musnid, oo la oofsaday sanadka sagaal boqol iyo saddex iyo labaatanka Hijriga. Al Qasdhalaanii wuxuu boggaa laba boqol iyo toddobaatan ee mujalladka toddobaad ee sharaxa Al Zarqaanii ku yiri:

“Wa minhaa annahu laa yatazawwaju calaa banaatihi. Fa cani Al Miswari bin Makhramah annahu samica Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam calaa al minbari yaquulu: “inna Banii Haashim bin Al Mughiirah ista’ thanuunii fii an yankixuu ibnatahum Caliyyaa bin Abii Dhaalibin, falaa aathanu lahum, thumma laa aathanu lahum thumma laa aathanu lahum illaa an yuxibba ibnu Abii Dhaalibi an yudhalliqa ibnatii wa yankixa ibnatahum, fa innamaa ibnatii bidcatun minnii yuriibunii maa raabahaa, wa yu’thiinii maa aathaahaa.” Akhrajahu Al Shaykhaani, wa saxxaxahu Al Tirmithii.

W canhu anna Caliyya bin Abii Dhaalibi khadhaba binta Abii Jahl, wa cindahu Faadhimatu bintu Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, falammaa samicat bi thaalika Faadhimah atat Al Nnabiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fa qaalat: “inna qawmaka yataxaddathuuna annaka laa taghdibu li banaatika, wa haathaa Caliyyu naakixun ibnata Abii Jahli.” Qaala Al Miswaru: “fa qaama Al Nnbiyyu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fa samictuhu xiina tashahhada qaala: “ammaa bacdu, fa innii ankaxtu Abaa Al Caasii ibna Al Rrabiica, fa xaddathanii fa sadaqanii, wa inna Faadhimah bintu Muxammadin bidcatun minnii, wa innamaa akrahu an yaftinuuhaa, wa Allaahi laa tajtamicu bintu Rasuuli Allaahi wa binta caduwwa Allaahi cinda rajulin waaxidin abadan.” Qaala: fa taraka Caliyyu al khudhbata.” Akhrajahu Al Shaykhaani.

Wa ismu bintu Abii Jahal haathihi: Juwayriyah, aslamat wa baayacat, wa tazawwajahaa Cattaab bin Asiid, thumma Abaan bin Saciid bin Al Caasii.

Qaala Abuu Dauudd: xurima calaa Caliyyi an yankixa calaa Faadhimah fii xayaatihaa, li qawliHi Tacaalaa: “Wa maa aatakumu Al Rrasuulu fa khuthuuhu wa maa nahaakum canhu fa intahuu” (Al Xashr: 7).

Wa thakara Al Shaykhu Abuu Calii Sinjii fii sharxi Al Takhliisi: “annahu yaxrumu al tazwiiju calaa banaati Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wa yaxtamilu an yakuuna thaalika khaassan bi Faadhimah radiya Allaahu canhaa, wa qad callala Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam bi anna thaalika yu’thiihi, wa ithaayatuhu xaraamun bi al ittifaaqi, wa fii haathaa taxriimu athaa man yata’ath-thaa Al Nnabiyyu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam bi ta’thiyatihi, li anna iithaa’a Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam xaraamun ittifaaqan qaliiluhu wa kathiiruhu. Wa qad jazama Calayhi Al Ssalaatu Wa Al Ssalaamu bi annahu yu’thiihi maa aathaa

Faadhimah, fa kullu man waqaca minhu fii xaqqi Faadhimah shay'an ta'ath-that bihi fa huwa yu'thii Al Nanibiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam bi shahaadati al khabari al ssaxiixi."

Sharaxa Zarqaani

Sharxu Al Callaamah Al Zarqaanii (waana Al Zarqaanii bin Cabdu Al Baaqii bin Yuusuf bin Axmad bin Calwaan al misrii al azharii, al maalikii, al imaamu, al muxaddith, al faqiih, al callaamah dhintayna kun iyo boqol iyo labo iyo labaatan Hijriga) calaa Al Mawaahibu Al Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah ee Al Qasdhalaanii (ahna al xaafith Shihaabu Al Ddiini Abuu Al Cabbaas Axmad bin Muxammad bin Abii Bakar bin Cabdu Al Malik bin Axmad bin Muxammad bi Xusayn bin Calii Al Qasdhalaanii Al Misrii Al Sh-shaaficii, al imaamu al callaamah, al xujjatu al rraaxilah, al faqiih, al muqri'u, al musnid, oo la oofsaday sanadka sagaal boqol iyo saddex iyo labaatanka Hijriga). Al Qasdhalaanii wuxuu boggaa laba boqol iyo toddobaatan ee mujalladka toddobaad ku yiri:

Xadiithka Al Miswaru bin Makhramah ee Al Bukhaarii iyo Muslim

("Wa minhaa annahu laa yatazawwaju calaa banaatihi) ay yaxramu oo macneheedu yahay: waa xaaraan in gabdhihiisa ayadoo la qabo gabar ama haween kale lala guursado. **(Fa cani Al Miswari ibnu Makhramah)** ibnu Nawfal bin Uhayb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah Al Qurashiyyi Al Zzuhriyyi, abii Cabdi Al Rrraxmaani oo ay isaga iyo aabihiis iyo hooyadiis Caatikah bintu Cawf oo ah walaasha la dhalatay Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf, waxay wada ahaayeen saxaabiyiin, wuxuuna dhashay laba sano Hajirada dabadeed, wuxuuna Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka xifthiyay Axaadiith, labada saxiixaynna (waana Al Bukhaarii iyo Muslim) waxaa ku yaalla dariiqyada Xadiithkaan lagu wariyay qaarkood wuxuu Al Miswaruku yiri:
"samictu Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wa anaa yawma'ithin muxtalumun, wa haathaa yadullu calaa annahu walada qabla Al Hijrati laakin adhbaquu calaa annahu walada bacdaha, wa qad ta'awwala bacduhum qawlahu muxtalumun calaa annahu mina al xilmi, bi al kasri, laa mina al xulmi, bi al dammi, yuriidu annahu kaana caaqilan daabidan limaa yataxammaluhu".
Hadalkaas macnihiisu waxaa weeye: "waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaabhu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam anigoo maalintaas caqli leh oo waxaan maqlo oo xafitho garanaya macneheeda. Taasu waxay ku tusaysaa inuu dhashay Hijrada horteed laakiin dad baa waxay ku dabbaqeen inuu dhashay Hijrada dabadeed, oo waxay eraygiisa muxtalamun u fasirteen inuu ka yimid al xilmi oo xa'du hoos dhaban tahay, uusanna ka imaan al xulumu oo godan, uuna ka wado inuu markaas ahaa caaqil garanaya macnaha wuxuu xafiday".
Wuxuuna dhintay sanadka afar iyo lixdan waxaana dilay dhagaxa kusoo dhacay oo ka mid ahaa dhagaxda manjaniiqa laga soo tuurayay markuu jayshka uu soo diray Yaziid bin Mucaawiyah usoo diray Cabdu Allaahi bin Al Zzubayru (oo Makkah jooga oo Amiiru Al Mu'miniina ka noqday: kan warka xasanwali waaye). Dhagaxu wuxuu kusoo dhacay isagoo taagan oo tukanaya, markaasuu shan maalmood noolaa wuxuuna dhintay maalinta Makkah la keenay warka sheegaya inuu Yaziid dhintay, sida ugu xusan kitaabka Al Isaabah.
(annahu samica Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam calaa al minbari yaquulu: "inna Banii Haashim): inuu maqlay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo minbarka saaran oo

leh: “waxaa dhacday inay reer Banii Haashim, sidaas ayuuna u wariyay saxiixu Muslim, sawaabtuna waxaa weeye sida uu u wariyay Al Bukhaarii oo yiri Hishaam **(bin Al Mughiirah)** Al Makhzuumii, ayadoo ay Banuu Hishaam yihiin adeerrada gabadha Abuu Jahal isagoo Abuu Jahal magaciisu yahay Camr bin Hishaam bin Al Mughiirah, oo labada nin oo la dhalatayna way wada islaameen oo kala ahaa Al Xaarithu bin Hishaam iyo Salamah bin Hishaam, waxayna islaameen sanadka Makkah la furtay (sanadka sideedaad xasanwali) (**ista’thanuunii**) waxay idan iiga qaateen oo i waydiisteen. Riwaayad kalena waxay warisay: “ista’thanuu” oo isla macnaha ah **(fii an yunkixuu**) oo ah inahy u guuriyaan (**ibnatahum Caliyyaa bin Abii Dhaalibin)** oo macneheedu yahay: “gabadhooda Caliyyu bin Abii Dhaalib”. Al Xaakim wuxuu isaguna ku wariyay sanad ama silsilad saxiix ah oo uu wariyay Suwayd bin Ghafalah oo ka mid ah Al Mukhdarimiina oo ah kuwa islaamay intuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam noolaa aanse la kulmin Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuuna yiri: “Calii ayaa wuxuu gabdha Abuu Jahal ka doonay adeerkeed Al Xaarithu, markaasuu la tashaday Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam markaasuu wuxuu ku yiri: **“acan xasabihaa tas’alunii?”** oo macnihiisu yahay: “ma nasabkeeda ayaa iga wareysanaysaa iyo inay kuf kuu tahay weeye?” fa qaala: “laa, wa laakin ata’murunii?” oo macneheedu yahay: “maya, ee waxaan ku weydiinayaa inaad ii oggolaaneysid inaan guursado.” Qaala: **“laa”** oo macnihiisu yahay: “maya oo kuu oggolaan mayo.”Al Xadiitha.

(falaa aathanu lahum) oo macnihiisu yahay: “u oggolaan mayo inay u guuriyaan”, **(thumma laa aathanu lahum thumma laa aathanu lahum)**: oo macnihiisu yahay: “u oggolaan mayo, kaddibna u oggolaan mayo oo saddex goor ayuu ku celceliyay.

Al Karmaanii (oo ah Judayc bin Calii Al Azdii Al Karmaanii Sheekha Khurasaan oo maanta iiraan ka tirsan, iyo faariskeedaba, kuna dhashay magaalada Karmaan oo ayada loo nisbeeyey siduu Al Ziriklii ugu wariyay Mujalladka labaad bogga boqol iyo afar iyo toban: wuxuu dhintay oo la dilay sanadka Hijriga ah ee boqol iyo sagaal iyo labaatan una dhiganta toddoba boqol toddoba iyo afartan miilaadiga: xasanwali) wuxuu yiri: “diidmada labaad oo ah “u oggolaan mayo” waxay xoojinaysaa midda hore waxaana ku sugan ishaaro mudada diidmada inuu gabadhaas ku guursado sii adkeyneysa, sida isagoo doonaya inuu maladaba meesha ka bixiyo mudaday diidmadaasi ku saabsan tahay oo ah muddo go’an, oo markaasu yiri: “thumma laa aathanu” ay: “wa law madat al muddatu al mafruudatu taqdiiran laa aathanu bacdahaa, thumma kathaalika abadan” oo hadalkaas macnihiisu waxaa weeye: “xattaa hadday dhammaato mudada diidmadaasu ku saabsan tahay oo la qadaro, markay mudadaas dhammaatana u oggolaan mayo dabadeed, oo sidaasaanan ugu oggolaanayn ebedkiis.” Waa intaas warka Al Karmaanii.

(illaa an yuxibba): oo macnihiisu yahay inuu jecel yahay mooyee, kanu lafthiga Muslim, lafdiga Al Bukhaariina waa sidatan: **“illaa an yuriida” (ibnu Abii Dhaalibi an yudhaliiqa ibnatii)** oo macneheedu yahay: “inuu ibnu Abii Dhaalib jecel yahay mooyee oo uu isagu sidaas doorto oo aan lagu khasbin inuu gabadhayda furo**” (wa yankixa ibnatahum, fa innamaa ibnatii bidcatun minnii)** oo macnihiisu yahay: “oo uu markaas gabadhooda guursado. Sababtuna waxay tahay inay gabadhaydu tahay cad ka mid ah hilibkayga, siduu u yiri Al Xaafithu (ibnu Xajar Al Casqalaanii: xasanwali). **(yuriibunii maa raabahaa)** oo macnihiisu yahay: “nuskhad kalena waxay warisay: **“maa araabahaa”** labadoodubana waa saxiix waxaa la yiraahdaa: “raabanii fulaanun wa raabanii itha ra’ayta minhu maa takrahuhu (oo ah waxaa la yiraahdaa hebel raabanii markuu kuu geysto oo aad ka aragtid waxaad kahanaysid), oo ah: aniguna waan kahanayaa waxay ayadu kahanayso. **(wa yu’thiinii maa aathaahaa)** oo macnihiisu yahay: “waxaa anigana i dhibaya waxa ayada dhibada.”

Marka qofka gabadhiisa dhiba Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam isaguu dhibay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, taasoo ijmaac ka jiro inay xaaraan tahay. Wa lam yaqul: maa yu'thiihaa ishaaratun ilaa anna athaahu musabbabun can athaahaa: oo macnihiisu yahay: "ma uusan oran Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam "waxa ayada dhiba" taasoo ishaareysa in isaga dhibtiisa ama dhibiddiisa ay sabab u tahay oo ay dhibka u keentay dhibidda ayada la dhibay." Fa al macnaa ithaa aathaahaa axadun aathaanii" oo macnihiisu yahay: "haddii uu gabadhiisa axad dhibo Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam axadkaas aniguu i dhibay". Wa haathaa tacliilun li cadami ithnihi yacnii anna al maanica lii mina al ithnii annahu yu'thiihaa kamaa yu'thiinanii" oo macnihiisu yahay: "Kaasuu waa tacliilka ama sababta uu u oggolaan waayay, yacnii "waxa ii diidaya inaan u oggolaado waxaa weeyey inuu la guursigaasu ayada dhibayo siduu aniga ii dhibaya oo kale." (**Akhrajahu Al Shaykhaani)** Xadiithkana waxaa wariyay Al Bukhaarii iyo Muslim kuna wariyay meelo kala duwan ayagoo ah labada ugu sarreysa kutubbada saxiixa ah. Wuxuuna u xusay Al Qasdhalaanii **(wa saxxaxahu Al Tirmithii)** inuu Al Tirmithii saxiixnimada Xadiithkaan caddeeyey diidayana inuu yahay mawduuc, oo ah Xadiith been ah oo cid kale hindistay oo kutubbada la dhex geliyay.

Al Xaafith ibnu Xajar: wuxuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Minbarka u fuulay inuu xukunkaas shaaciyo oo laga qaato

Al Xaafith (waana Axmad bin Calii bin Muxammad Al Kinaaniyyi Al Casqalaanii, Abuu Al Fadl, Shihaabu Al Ddiini, ibnu Xajar oo ka mid imaamyada cilmiga iyo diinta, asalkiisuna uu yahay degmada Casqalaan oo ku taalla arliga Falasdhiin, kuna dhashay kuna dhintay Al Qaahira ee arliga Masar, una safray Yaman, Xijaaz iyo dalal kaleba si uu shuyuukhda uga barto Xadiithka, oo uu cilmigaas caan ku noqday oo laga soo doonan jiray, kutubtiisana intuu noolaaba ay faafeen oo boqorraduba hadiyo ahaan isku siin jireen. Masa ayuu qaalli u noqday dhawr goor kaddibna uu iska cazilay. Wuxuu allifay kutubbo badan oo aad u qiimo badan uuna ka mid yahay "Fatzu Al Baarii fii Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii. Wuxuuna dhintay sanadka sideed boqol laba iyo konton Hijriga una dhiganta kun afar boqol sagaal iyo afartan miilaadiga: xasanwali kana soo qaatay Al Iclaamu uuna dhigay Al Zirikli mujalladka koowaad bogga boqol sideed iyo toddobaatan) wuxuu yiri: innamaa qaama Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam khadhiiban li yushiica al xukma allathii sayuqarriruhu, wa ya'khuthuu bihi calaa sabiili al wujuubi aw al awwaliyati. Wa ghafala Al Shariifu Al Murtadaa can haathi al nuktati, fa zacama anna haathaa Al Xadiithu mawduucun, li annahu fii riwaayati Al Miswari, wa kaana fiihi inxiraafun calaa Caliyyi, wa jaa'a min riwaayati ibna Al Zzubayri wa huwa ashaddu fii thaalika, wa radda kalaamahu bi idhbaaqi asxaaba al ssaxiixi calaa takhriijihi. intahaa"

Hadalka ibnu Xajar macnihiisu waxaa weeye: "Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu u istaagay oo minbarka u fuulay oo uu u khudbeeyey si uu u faafiyo oo dadka ugu sheego xukunka uu markaas ridi doono, ayna xukunkaas u qaataan inuu waajib yahay ama uu mudnaanta koowaad leeyahay. Al Shariifu Al Murtadaa waxaa seegtay oo uusan garan tafsiirkaas qarsoon, markaasuu wuxuu sheegay inuu Xadiithkaanu mawduuc yahay sababtuna tahay inuu wariyay Al Miswaru oo uu janjeray xagga Calii." Waa intaas warka Al Xaafithu. Shariifkaanna wuxuu ka mid yahay madaxda shiicada, hadalkaas uu yirina waxaa ku xambaaray inuu yiri: "Calii kama suurtowdo inuu taas sameeyo" oo ah inuu damco inuu Faadhimah Calayhassalaamu la guursado.

Waa intaas tafsiirka Xadiithkaas. Kan soo socdana waa Xadiith kale.

Sharaxa Xadiithka Labaad ee Al Miswaru bin Makhramah

(Wa canhu): wuxuu kaloo Al Miswaru wariyay oo yiri: **(anna Caliyya bin Abii Dhaalibi khadhaba binta Abii Jahl, wa cindahu Faadhimatu bintu Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam)**: "inuu Calii bin Abii Dhaalib doonay inuu guursado gabdhuu dhalay Abuu Jahal isago markaasna ay u dhaxdo Faadhimah gabadha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Markaasuu markuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam diiday ayuu Calii dooniddaas ka haray.

(Falammaa samicat bi thaalika Faadhimah atat Al Nnabiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fa qaalat: "inna qawmaka yataxaddathuuna): markaasay Faadhimah markay maqashay arrinkaas Calii doonayo ayay waxay u timid Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ayna tiri: "Dadku waxay leeyihiin oo ku sheekeysanayaan",
(annaka laa taghdibu li banaatika) oo ah inaadan gabdhahaaga marka la dhibo aadan ka caroon." Sababtuna ay tahay ay arrinkaas uga sheekeysanayaan inay naxariistiisa iyo turiddiisa badan arkeen iyo isagoo aan naftiisa haddii la xumeeyo u caroon oo ka carooda oo keli ah marka Ilaahay xurumaatkiisa lagu xad gudbo. **(wa haathaa Caliyyu naakixun ibnata Abii Jahli)** oo macneheedu yahay: "Caliina waa kanaa oo wuxuu doonayaa inuu gabadha Abuu Jahal guursado**."**
(Qaala Al Miswaru: **"fa qaama Al Nnbiyyu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam):** oo macnihiisu yahay: "Al Miswaru wuxuu yiri: "markaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam istaagay oo intuu minbarka korkiisa fuulay khudbo u istaagay." **(fa samictuhu xiina tashahhada):** oo macnhiisu yahay: "markaasaan maqlay markuu ashahaatay", riwaayada Al Bukhaarii iyo Muslimna wuxuu ku daray: "wa anaa yawma'ithin muxtalamun" oo ah: "anigoo markaas ama maalintaas caqli leh oo waxaan maqlo garanaya". (**qaala: "ammaa bacdu, fa innii ankaxtu Abaa Al Caasii)** oo macnihiisu yahay: "wuxuu yiri: "intaas bacdigeedna anigu waxaan u guuriyay Abaa Alaa Caasii" oo magaciisu yahay Laqiidh ama Miqsam, ama Hashiim ama magac kaleba, **(ibna Al Rrabiica)**: bin Rabiicah bin Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf, hooyadiisna waa Haalah bintu Khuwaylid oo ah Khadiijah walaasheed, oo gabadha gabdhihiisa ugu da'a wayn ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Zaynab ayuu islaamka hortiis u guuriyay. **(fa xaddathanii fa sadaqanii):** oo ah: "wuu ii warramay, runta ayuuna ii sheegay", riwaayad kalena waxay ku kordhisay: **"wa wacadanii fa wafaa lii"** oo macnihiisu yahay: "ballan ayuu iga qaaday waana ii oofiyay."
Al Xafith wuxuu yiri: "wa lacallahu kaana sharadha calaa nafsihi an laa yatazawwaja calaa Zaynab, wa kathaalika Caliyyu, fa in yakun kathaalika fahuwa maxmuulun calaa anna Caliyyan nasiya thaalika al shardha, fa li thaalika aqdama calaa al khudhbati, aw lam yaqac calayhi shardhun, ith lam yusarrix (saad) bihi, laakin kaana yanbaghii lahu an yuraaciya haatha al qadra, fa li thaalika waqacati al mucaatabatu, wa kaana Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qalla an yuwaajiha axadan bimaa yucaabu bihi, wa lacallahu innamaa jahara bi mucaatabati Caliyyi mubaalaghatan fii ridaa Faadhimah, wa kaanat haathihi al waaqicatu bacda Fatxi Makkah, wa lam yakun xiina'ithin ta'akh-khara min banaatihi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ghayrahaa, wa kaanat usiibat bacda ummihaa bi akhwaatihaa, fa kaana idkhaalu al ghayrata calayhaa mimmaa yaziidu xuznahaa. Intahaa."

Hadalka Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaani macnihiisu waxaa weeye: "Waxaa dhici karta inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Abuu Al Caasii markuu Zaynab siinayay uu shardi uga dhigay inuusan la guursan. Sidoo kalena Calii uu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, shardigaas ku xiray markuu Faadhimah u guurinayay. Hadday sidaas ahaydna, uu hadana Calii damcay inuu Faadhimah la guursado, waxay ixtimaaleysaa oo dhici karta inuu Calii shardigaas halmaamay, oo uu guurkaas kale u damcay. Ama shardiba ma dhicin ayadoo uusan Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam si caddaan u sheegin, laakiin waxay ahayd inuu Calii inuu qadarkaas tixgeliyo oo ilaaliyo oo dareemo, taas ayaana u sabab ah inay eedeyntu ama eed sheegashadu u dhacday. Wayna yarayd inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam axadna ku sheego wax lagu ceebeeyo. Waxaana dhici karta inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam warkaas ayadoo la wada maqlayo ugu hadlay isagoo ku xeel dheeraanaya raalli gelinta Faadhimah. Dhacdadaanna waxay ahayd Furashada Makkah dabadeed ayadoo markaas ayadoo ayan gabdhihiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam midna waqtigaas soo gaarin aan ayada ahayn. Ayadana waxaa ku dhacay dhibaatada inay hooyadeed ka dhimatay dabadeedna ay gabdhihii la dhashay hadana wada dhinteen, oo haddii masayr intaas ugu darsamo ay tiiraanyadeedu sii kordheyso." Waa intaas warka Al Xaafith.

(wa inna Faadhimah bintu Muxammadin bidcatun minnii) oo macnihiisu yahay: "oo Faadhimah bintu Muxammad waa cad hilib ah oo aniga iga mid ah", Al Xamawii wuxuu isaguna Abuu Tharr ka wariyay **"mudghatun"** oo ah "goosin" waana isla macne oo wada cad hilib ah.

(wa innamaa akrahu an yaftinuuhaa) ahna lafdiga Muslim oo macnihiisu yahay: "waxaanna kahanayaa in diinteeda laga fitneeyo", Al Bukhaariina uu wariyay: **"innii akhaafu an tuftana fii diinihaa"** oo macnihiisu yahay: "waxaana ka baqayaa in diinteeda laga fitneeyo". Al Bukhaarii wuxuu kale kitaabka Al Manaaqibi ku wariyay: **"wa inni akrahu an yasuu'ahaa"** ay axadun Caliyyu aw ghayrahu" oo macnihiisu yahay: "anna waxaan kahanayaa inuu xumeeyo ama dhibo" axad kasta ha ahaado Calii ama ghayrkiisba.

Riwaayad ay Al Bukhaarii iyo Muslim wada wariyeenna waxay ku ziyaadisay**: "wa innii lastu uxarrimu xalaalan wa la uxillu xaraaman"** oo ah: "aniguna xaraan ka dhigi mayo wax xalaal ah xalaalna ka dhigi mayo wax xaaraan ah" wa laakiin **(wa Allaahi laa tajtamicu bintu Rasuuli Allaahi wa binta caduwaa Allaahi cinda rajulin waaxidin abadan)** oo macnihiisu yahay: "wa Allaahi inay inayan gabadha Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo gabadha cadawga Ilaahay nin waaxid ah agtiisa ku wada kulamayn oo uusan wada qabayn." Qaala: **(fa taraka Caliyyun al khudhbata)**, oo macnihiisu yahay: "wuxuu yiri: "markaasuu Calii iska dhaafay gabadhuu doonayey inuu Faadhimah la guursado." Akhrajahu Al Shaykhaani: waxaa wariyay Al Bukhaariiiyo Muslim.

Fatwada ibnu Al Tiini

Ibnu Al Tiini wuxuu yiri: "asaxxa maa taxmilu calayhi haathihi al qissatu annahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam xarrama calaa Caliyyin an yajmaca bayna ibnatihi wa bayna ibnata Abii Jahlin, li annahu callala bi anna thaalika yu'thiihi, wa uthiyatuhu xaraamun bi al ijmaaci. Wa macnaa qawluhu: "laa uuxarrimu xalaalan" annaha xalaalun lahu law lam takun cindahu Faadhimah, wa amaa al jamcu baynahumaa al mustalzimu ta'thiyatun li ta'thiyati Faadhimah falaa." Intahaa.

Hadalka ibnu Al Tiini macnihiisu waxaa weeye: "waxa ugu saxiixsan oo ay qisadaani sheegeyso waxaa weeye inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Calii xaaraan uga dhigay inuu agtiisa ku kulmiyo oo ay u wada dhaxaan gabdhiisa Sallaa Allahu Calayhi Wsa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo gabadha Abuu Jahal, isagoo cillad waa sababee uga dhigay inay taasu dhibayso, dhibkiisuna sida la isku wada waafaqsan yahay waa xaaraan oo ijmaac ayaa ka jira. Hadalkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ahna: “wax xalaal ah anigu xaaraan ka dhigi mayo” macnihiisu waxaa weeye inay Calii inuu gabdhaas Abuu Jahal dhalay uu guursado ay xalaal u ahaan lahayd haddayan Faadhimah u dhixin, inuuse wada qabo ay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhib ku tahay ayadoo ay Faadhimah taas dhibsanayso.” Waa intaas warkiisu.

Juwayriyah bintu Abii Jahal

(Wa ismu bintu Abii Jahl haathihi: Juwayriyah, aslamat wa baayacat, wa tazawwajahaa Cattaab bin Asiid, thumma Abaan bin Saciid bin Al Caasii) oo macnihiisu yahay: “magaca gabadhaan Abuu Jahal dhalay oo uu Calii doonay magaceedu waa Juwayriyah, waxaa kaloo la yiri waa Jamiilah. Abuu Jahal wuxuu lahaa gabar kale oo la yiraahdo Safiyyah waxaana guursaday Suhayl bin Camr. Juwayriyah wayna islaantay oo ay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam baayacday Axaadiithna ka warisay, waxaana guursaday Cattaab bin Asiid Amiirka Makkah waxayna u dhashay wiilkiisa Cabdu Al Rraxmaanu bin Cattaab, isagoo qaba ayuuna ka dhintay (oo jihaad ayaa lagu dilay xasanwali), isaga dabadiisna waxaa guursaday Abaan bin Saciid bin Al Caasii bin Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf Al Qurashiyyi Al Amawiyyi, Al Ssaxaabii.”
(Gabadhaas uu Abuu Jahal dhalay, dhacdadaas kaddib waxaa guursaday saxaabiga la yiraahdo Cattaab bin Asiid bin Abii Al Ciisii bin Umayyah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah Al Qurayshiyyi Al Amawii, oo isagoo kow iyo labaatan jir ah uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah markuu furtay uu guddoomiye uga dhigay. Cattaab markay qisadaas dhacday ayuu wuxuu yiri: "Anigaa dhibkeeda -waana Juwayriyyah, gabadha Abuu Jahal-idinka qaadaya", oo uu markaas guursaday. Cattaab waa ninkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu xilkaas guddoomiyennimada Makkah u dhiibay, uu ku yiri, siduu Ibnu Al Athiir u wariyay**: "Yaa Cattaab, tadrii calaa man istacmaltuka? Istacmaltuka calaa ahli Allaahi Cazza wa Jalla. Wa law aclamu lahum khayran minka istacmaltuhu calayhim."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Cataabow, ma ogsoon tahay dadka aan taladooda kuu dhiibay oo aan guddoomiye kaaga dhigay? Waxaan kuu dhiibay xilka ehelka Ilaahay Cazza wa Jalla. Haddaan ogaan lahaa qof adiga kaa khayr badan oo an xilkooda u dhiibo, isagaan xilkooda u dhiibi lahaa." Taas waxay Cattaab u tahay bishaaro iyo faan manaaqibtiisa ka mid ah. Xasanwali kana soo qaatay kitaabkiisa Faadhimah).

Fatwada Abuu Daauud Allaha u naxariistee

Qaala Abuu Dauudd: “xurrima calaa Caliyyi an yankixa calaa Faadhimah fii xayaatihaa, li qawliHi Tacaalaa: **“Wa maa aatakumu Al Rrasuulu fa khuthuuhu wa maa nahaakum canhu fa intahuu”** (Al Xashr: 7).”
Abuu Daauud hadalkiisu waxaa weeye: “
Calii waxaa laga xaaraantimeeyey inuu Faadhimah haweeney kale la guursado intay ayadu noolayd, waxaana u sabab ah hadalka Ilaahay: **“Wa maa aatakumu Al Rrasuulu fa khuthuuhu wa maa nahaakum canhu fa intahuu”** (Al Xashr: 7)” oo macneheedu yahay: “Wuxuu idin faro Rasuulku Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa

Aalihi Wa Sallam yeela oo la imaada wuxuu idinka reebana ka reebtooma." Waana Aayadda toddobaad ee Suuratu Al Xashri.
Sidaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Calii uga reebay inuu Faadhimahla guursado.

Fatwada Al Shaykhu abuu Calii Al Sinjii

(Wa thakara Al Shaykhu Abuu Calii Al Sinjii) (Al Shaykhu Al Xusaynu bin Shucayb bin Muxammad Al Sinjii, Abuu Calii, faqiiha degmada Marwu zamankiisa, ahaan shaafici loona nisbeeyey Sinji oo ah tuulo ka tirsan degmada Marwu oo ka mid ahayd boqortooyada Faaris zaman ku beegan in ka badan shan boqol oo sano dhalashada Nabi Ciise Calayhissalaamu horteed siduu u xusay Dr. Shawqii Abuu Khaliil kitaabkiisa Adhlas al taarikh al carabii al islaamii bogga sagaal iyo toban, xagga galbeed iyo koofurna ka xigtay Bukhaaraa iyo Samarqand oo maanta ka wada tirsan dawladda Uzbekistaan. Marwu waxay ahaan jirtay magaalo weyn iyo magaalo cilmi. Wuxuuna dhintay sanadka afar boqol toddoba iyo labaatan Hijriga, una dhiganta kun lix iyo soddon miilaadiga, siduu ugu xusay Al Ziriklii mujalladka labaad bogga laba boqol sagaal iyo soddon. Kitaab kutubbadiisa ka mid ahna lana yiraahdo "Al Majmuucu" waxaa kasoo qaatay oo soo guuriyay Al Imaamu Al Ghazaali Abuu Xaamid kuna dhigay kitaabkiisa "Al Wasiidhu" ahna kitaab fiqiga shaaficiga. Xasanwali)
(fii sharxi Al Takhliisi: "annahu yaxrumu al tazwiiju calaa banaati Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wa yaxtamilu an yakuuna thaalika khaassan bi Faadhimah radiya Allaahu canhaa).
Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Al Shaykhu abuu Calii Al Sinjii, oo ah mid ka mid ah culumada waawayn ee shaaficiyada, asxaabu al wujuuhi (madaxda bulshadana ka mid ah oo loo soo joogsado) loona nisbeeyey Sinji tuulada Marwu wuxuu kitaabkiisa "Sharxu al talkhiisi" uuna dhigay ibnu Al Qaas (saad) ku xusay inay xaaraan tahay in lala guursado gabdhaha Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Intaasuu ku egyahay warka Abuu Calii. Haddii lala guursadana guurkaasu waa baadhil ayan waxba ka jirin sababtuna ay tahay inuuba xaaraan yahay oo la iskaba reebay oo laga faaiideysanayo Aayadda **"Wa maa aatakumu Al Rrasuulu fa khuthuuhu wa maa nahaakum canhu fa intahuu"** (Al Xashr: 7)."
Guurkaasna wuxuu baadhil u yahay ayadoo asalkiisaba iyo guntintiisaba la iska reebay.

Fatwada Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaanii ee Fatxu Al Baarii

Fatxu Al Baarii wuxuu yiri: "lama fogeysanayo in lagu tiriyo waxa Nabiga khaas u ah inaan gabdhihiisa lala guursan. Kitaabka "fii sharxi Al Takhliisi" wuxuu yiri: "annahu yaxrumu al tazwiiju calaa banaati Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wa yaxtamilu an yakuuna thaalika khaassan bi Faadhimah radiya Allaahu canhaa." Waxayna ixtimaali karta inay taasu Faadhimah Allaha raalli ka noqdee khaas u tahay, ayadoo ay gaartay dhibatada ah inay hooyadeed ka dhimatay ayada dabadeedna gabdhaha la dhashay oo walaaleheed ah oo midba midda kale dabadeed ka dhinteen oo uusan markaas u harin cid ka kaalmeysa amarka masayrka." Intaasuu ku egyahay warka Fatxu Al Baarii.

Sababta loo xaaraantimeeyey

(wa qad callala Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam): Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuu cilladeeyey oo sheegay sababta uu dadka uga reebay in gabdhihiisa lala guursado oo wuxuu yir: **(bi anna thaalika yu'thiihi, wa ithaayatuhu xaraamun bi al ittifaaqi, wa fii haathaa taxriimu athaa man yata'ath-thaa Al Nnabiyyu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam bi ta'thiyatihi, li anna iithaa'a Al Nnabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam xaraamun ittifaaqan qaliiluhu wa kathiiruhu): "Wa maa kaana lakum an t'uthuu Rasuula Allaahi wa laa an tankixuu azwaajahu min bacdihi abadan inna thaalikum kaana cinda Allaahi cathiiman".**
Sababtuna waxay tahay: "inay taasu isaga dhibayso, isaga in la dhibana Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waa xaaraan sida la isku waafaqsan yahay. Midkaanna waxaa ku sugan inay xaaraan tahay in la dhibo qofkuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhibsanayo dhibkiisa.Sababtuna waxay tahay inay dhibidda Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam xaaraan tahay sida la isku waafaq san yahay in yar iyo in badanba, oo Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Wa maa kaana lakum an t'uthuu Rasuula Allaahi wa laa an tankixuu azwaajahu min bacdihi abadan inna thaalikum kaana cinda Allaahi cathiiman"** waana qayb ka mid ah Aayadda saddex iyo konto ee Suuratu Al Axzaabi oo macneheedu yahay: "idiinma bannaana oo xalaal idiinma aha inaad Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u geysataan wax dhib ah oo dhiba noocu doono ha ahaadee, mid yar iyo mid weynba, sidoo kalena idiinma bannaana oo xalaal idiinma aha inaad isaga dabadiis Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam haweenkiisa guursatan ayadoo ay falidda kuwaasu Ilaahay agtiisa dambi wayn ka yihiin."

Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhibay qofka Faadhimah dhiba

(Wa qad jazama Calayhi Al Ssalaatu Wa Al Ssalaamu bi annahu yu'thiihi maa aathaa Faadhimah, fa kullu man waqaca minhu fii xaqqi Faadhimah shay'an ta'ath-that bihi fa huwa yu'thii Al Nanibiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam bi shahaadati al khabari al ssaxiixi) oo macnihiisu yahay: "Nabiguna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu si caddaan ah oo kama dambays ah u sheegay inay isaga dhibayaan waxa Faadhimah dhiba. Sidaas daraadeed qof kasta oo xaqqeeda ka gaabiya oo wax ka dhima oo meel uga dhaca way ku dhibtooneysaa taasoo Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhibaysa siday uga markhaati kaceen Axaadiitha saxiixa oo la soo xusay.

Ibnu Xajar: Dhibidda gabdhaha Asharaafta waxay dhibaysaa Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam adduunkana ciqaab degdeg ayaa ku dhacda aakhirana ciqaab ka adag

Fatxu Al Baarii wuxuu intaas ku daray oo yiri: "wa laa shay'a acthamu min idkhaali al athaa calayhaa min qibali walidihaa, wa li haathaa curifa bi al istqraa'i mucaajalata man tacaadhaa thaalika bi al cuquubati fii al dunyaa, wa la cathaabu al aakhirati ashaddu." Intahaa. Warkaas Al Xaafith ibnu Xajar macnihiisu waxaa weeye: "ma jiro dhib ka wayn oo Faadhinah loo geysan karo oo ka wayn dhib looga geystay xagga caruurteeda. Taas daraadeed ayaa la ogaaday markay ragi qirteen in ciqaabta

adduunkaan loogu soo dedejiyay rag dhibkaas u geystay, cathaabta aakhirana way ka wayntahay oo ka adag tahay.” Waa intaas warka Fatxu Al Baarii.

Fatwada Shariifka Al Samhuudii

Al Shariifu Al Samhuudii (waana Calii bin Cabdu Allaahi bin Axmad Al Xasanii al shaaficii Nuuru Al Ddiini Abuu Al Xasan, mu’arrikhu Al Madiinah Al Munawwarah wa muftiihaa, waana asharaaf isagoo ku abtirsada Al Xasan bin Faadhimah Sallaa Allaahu Calayhim Wa Sallam, wuxuu ku dhashay Samhuud oo ah magaalo ku taalla koofurta Masar, wuxuuna ku koray Al Qaahira kaddibna wuxuu degay oo ku dhintay Al Madiinah Al Munawwarah sagaal boqol kow iyo toban Hijriga una dhiganta kun shan boqol iyo lix miilaadiga, kutubbadiisana waxaa ka mid ah oo aan anigu haystaa Wafaa’u Al Wafaa’i bi akhbaari daari Al Musdhafaa oo laba mujallad oo waawayn ah afar juzna ka kooban oo lagu daabacay Al Riyaad dalka sucuudiga, waana kitaab aad u qiimo badan oo aniguba aad uga faaiidaystay. Xasanwali: warkiisana waxaan kasoo qaatay Al Ziriklii mujalladka afaraad bogga saddex boqol iyo toddoba, kitaabkuna waa “Al Iclaamu qaamuusu taraajim”) wuxuu yiri: “wa macluumun anna awlaada Faadhimah bidcatun minhaa, fa yakuunuuna bi waasidhatihaa bidcatan minhu, wa min thamma lammaa ra’at Ummu Al Fadli fii manaamihaa anna bidcatan minhu wudicat fii xijrihaa awwalahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam bi anna Faadhimah talidu ghulaaman, fa yuudacu fii xijrihaa fa waladat Al Xasana, fa wudica fiihi, fa kullu man yushaahidu al aana min thurriyatihaa bidcatun min tilka al bidcati, wa in tacaddadat al wasaa’idhu, wa man ta’ammala thaalika inbacatha min qibalihi dawaaciya al ijlaali lahum, wa tajannaba baghdahum calaa ayyi xaalin kaanuu.” Intahaa.
Hadalka Shariifka macnihiisu waxaa weeye: “waxaa la ogsoon yahay inay caruurta Faadhimah cad ayada hilibkeeda ka mid ah yihiin, oo sidaasay ayadoo ayada loo marayo ay caruurteedo ku yihiin cad ka mid ah hilibkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Waaba ayaday Ummu Al Fadli haweenta Al Cabbaasu Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam adeerkiis ahna hooyada dhashay Cabdu Allaahi bin Cabbaas Allaha dhammaantood raalli ka noqdee habeen ku riyootay ayadoo hurudda inuu cad ka mid ah hilibkiisa Sallaa Allaahu Calayhi a Calaa Aalihi Wa Sallam kusoo dhacay dhabteeda, markaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu u fasiray inay Faadhimah wiil dhali doonto oo markaas wiilkaas dhabteeda la saari doono. Markaasay waxay dhashay Al Xasanu oo markaas dhabteeda la saaray. Marka inta jirta oo loo jeedo hadda oo ubadkeeda ka mid ah waa cad ka mid ah cadkaas inta (caruur) oo u dhexeysayba ha bataane. Qofka taas dhaaga oo garta waxaa isaga qalbigiisa kasoo askumaya wax ugu yeera oo ku xambaara wayneyntooda iyo inuu ka fogaado nacaybkooda (ama isagu uu naco ama ay ayaguba nacaan. xasanwali) xaal kastoo ay ayagu (Asharaaftu) ku sugan yihiin.” Waa intaas warka shariifka Al Samhuudii.

(Ummu Al Fadli magaceeduna yahay Lubaabatu Al Kubraa bintu Al Xaarith bin Xazn bin Bujayr bin Al Huzam bin Ruwaybah bin Cabdu Allaahi bin Hilaal bin Caamir bin Sacsacah bin Mucaawiyah bin Bakr bin Hawaazin bin Mansuur bin Cikrimah bin Khasafah bin Qays bin Caylaan bin Mudar. Ummu Al Fadli waxay lahayd lix gabdhood oo ay isla dhasheen oo walaalo yihiin isku hooyana ah Waxaana la yiri waxay ahaayeen sagaal gabdhood oo kala ah:
(Kow) **Maymuunah bintu Al Xaarith Ummu Al Mu'miniina**, Ummu Al Mu’miniina haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. (Laba) **Asmaa'u bintu Cumays** bin Al Nucmaanu bin Kacb bin Maalik bin Quxaafah, una

dhalatay qabiilka Khathcam. Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Hooyadeedna waa Hind bintu Cawf bin Zuhayr bin Al Xaarith Al Kinaaniyyah. Asmaa' waxay islaamtay mar hore, waxayna u haajirtay arliga xabashada ayadoo la socota ninkeeda Jacfar bin Abii Dhaalib, halkaas ayayna waxay ugu dhashay Cabdu Allaahi iyo Cawn iyo Muxammad. Kaddibna waxay u haajirtay Al Madiinah. Markaasaa marka Jacfar bin Abii Dhaalib laga dilay ayaa waxaa guursaday Abuu Bakr Al Siddiiqu, waxayna u dhashay Muxammad bin Abii Bakr Al Siddiiq. Markaasuu Abuu Bakr ka dhintay, waxaana kaddibna guursaday Calii bin Abii Dhaalib oo ay u dhashay Yaxyaa, oo aan la isku khilaafsanayn iyo Cawn ayaa la yiri.
Walaasheed kalena, oo magaceedu yahay (Saddex) **Sulmaa bintu Cumays**, waxay u dhaxday Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Asmaa'u waxay ahayd haweenta dadka ugu xidid kariimsan, oo dumaashiyaalkeed waxaa ka mid ahaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Xamzah iyo Al Cabbaas, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee iyo ghayrkoodba. Waxaa la wariyay inay Asmaa'u Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, ku tiri: "Ilmaha Jacfar waa la ilaystaa dhakhseyna ishu u qabataa ee ma ka qaadaa oo daaweeyaa (waa afa'astarqii lahum)?" (waana Quraan iyo duco Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga bartay). Markaasuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Nacam**", oo ah "Haa". Walaasheed afaraadna waa (Afar) **Lubaabah Al Sughraa**, Al Kubraa-na waa la yiri, waana hooyada dhashay Sayfu Allaahi Al Masluul Khaalid bin Al Waliid bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar Al Makhzuumii."
Tobankaas (ama sagaalkaas) gabdhood oo wada dhashay waa kuwuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka yiri: **“Al Akhwaatu mu'minaatun**", oo macneheedu yahay: "Gabdhaha walaalaha ahi waa mu'minaat, rumeeyey." Allow u naxariiso oo raalli ka noqo Asmaa'u bintu Cumays iyo walaaleheed. Xasanwali oo kasoo qaatay kitaabkiisa “Al Cabbaasu”.)

Fatwada Al Imaamu Axmad, Al Xaakim, Al Dhabraanii

Axmad iyo Al Xaakimu iyo Al Dhabraanii waxay wada wariyeen inuu Xusayn bin Xusayn doonay gabdha Al Miswaru bin Makhramah. Markaasuu Al Miswaru wuxuu ku yiri: “ma jiro nasab mana jiro xididnimo aan ka jeclahay nasabkiinna iyo xididnimadiinna, laakiin Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri: **“Faadhimah bicdatun minnii yaghdibunii maa yaghdibuhaa, wa yabsudhunii maa yabsudhuhaa”** oo macnihiisu yahay: Faadhimah waa cad hilibkayga ka mid ah wa ayada ka caraysiiyaa anigana way iga caraysiiyaan, waxa farax geliyana anigana waa i farax geliyaan.” Adigana waxaa kuu dhexda oo agtaada joogta Faadhimah gabar ay dhashay. Marka haddaan gabadhayda kuu guuriyo taasuu ayaday caro gelineysaa.” Markaasuu ka gaddoomay isagoo u cudur daaray.

Kitaabka Thakhaa’iru Al Cuqbaa

Kitaabka Thakhaa’iru Al Cuqbaa wuxuu yiri: “fiihi daliilun calaa anna al mayyita yuraacaa minhu maa yuraacaa mina al xayyi, qaala wa lacalla muraada abii Caliyyi bi qawlihi: “yaxramu al tazwiiju calaa banaatihi man yunsabu ilayhi bi Al Nubuwwati, wa yakuunu haathaa Al Xadiithu daliilun.”
Warkaas macnihiisu waxaa weeye: “waxaa taas ku sugan daliil in dadka maytka ah oo dhintay ay dareemaan oo ay ka caroodaan ama u bogaan waxa ay dadka nooli

dareemaan oo nacaan ama u bogaan. Wuxuu yiri: “waxaana dhici karta inuu muraadka abii Caliyyi uu hadalkiisa ah: “waa ka xaaraan in lala guursado gabdhihiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ay yihiin kuwa ku abtirsada oo Nabinnimada ku nasab sheegta (waana gabdhaha Ashraafta: xasanwali). Xadiithkaan ayaana u daliil ah.” Waa intaas warka Thakhaa’iru Al Cuqbaa.

Al Imaamu Al Ssuyuudhii

Al Imaamu Al Ssuyuudhii (oo ah imaamka wayn oo shaaficiyada oo kutubbada aad u fara badan dhigay uuna ka mid yahay nus (oo nuska kale waxaa dhigay nin kale oo isagana Jalaalu Al Ddini la oran jiray: xasanwali.) Tafsiiru Al Jalaalayni, oo isagaa ah Jalaalu Al Ddiini Al Ssuyuudhii, dhigayna qiyaas lix boqol oo kitaab, magaciisuna waa Cabdu Al Rraxmaanu bin Abii Bakr bin Muxammad, ku dhashay magaalada Al Ssayuudh ee dalka Masar wuxuuna ku koray Al Qaahirah, wuxuuna dhintay sagaal boqol kow iyo toban Hijriga una dhiganta kun shan boqol iyo shan miilaadiga.
Wuxuu yiri: “fa in ukhitha haathaa calaa thaahirihi, fa muqtadaahu annahu yaxrimu al tazwiiju calaa thurriyati banaatihi, wa an yatacallaqu thaalika ilaa yawmi al qiyaamati, wa fiihi waqfah.” Intahaa.
Hadalka Al Ssayuudhii waxaa weeye: “haddii Xadiithkaan siduu u muuqdo loo qaato, (amaba hadalka ibnu Caliyyi) macnaha uu xambaarsan yahay waxaa weeye inay xaaraan tahay in lala guursado gabdhaha ay gabdhihiisu dhalaan, iyo inay taasu ku tacalluqdo ilaa maalinta qiyaame. Taasna waxay leedahay oo ku sugan hakad (oo ah ka fiirsasho?). Waa intaas hadalka Al Ssayuudhii.
Al Zarqaanii wuxuu yiri: “bal sax ma aha ayagoo ay rag tiro leh oo zaman kasta noolaa ay taas khilaafkeeda ku dhaqmeen oo la guursadeen. Xadiithkaanna wuxuu khaas u yahay gabdhihiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ama Faadhimah keligeed sidaan usoo aragnay. Inuu Al Miswaru gabadhiisa inuu ula guuriyo diidayna waxay tusineysaa badnida cabsidiisa Ilaahay ayna taas ku xambaartay inuu macnaha guud ee wuxuu maqlay uu qaatay oo uu u fasirtay (oo uu Xadiithka macnihiisa guud qaatay weeye).

Aniga Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan waxaan leeyahay: “Al Zarqaani Ilaahay wuxuu siiyay cilmi badan, aniguna aan inta Ilaahay ii qadaray ka qaatay Allaha ka abaal mariyee, dambigiisana dhaafo jannada Firdawsana isugu kaaya keeno, Nabigeennana Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aali Wa Sallam, bi abii huwa wa ummii, nala xiriiriyo. Warkiisaanna uu leeyahay: “sax ma aha” waa isaga aragtidiisa oo wax Xadiith ama xujjo taageerta hadalkiisaas ma keenin iyo wax xujju ah oo fatwada culummada kale oo aan fatwooyinkooda soo sheegnay mawqifkooda beddela. Hadday rag Xadiithkaas khilaafkiisa ku dhaqmeenna taasu Xadiithka waxaan jirin ka dhigi mayso, dhaqankoodana sax ka dhigi mayso. Allaha annaga iyo ayagaba dambigeenna dhaafo. Dhiintuna ra’yi ma ah iyo qof aragtidiis ee waa waxa Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam lagu soo dejiyay oo xagga Ilaahay Tacaalaa uga yimid”

Sidaasuu kitaabkaanu noogu dhammaaday waxaanna ku dhammayneynnaa annago leh al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin wa Calaa Aalihi Wa Saxbihi Wa Sallam tasliiman kathiiran.
Xasanwali: jamaadu al uulaa kun afar boql kow iyo soddon/abriile laba kun toban.